

NURSE-ON-CALL, waa bilowga caafimaadka ee Dawlada Victoria, waa adeeg taleefan oo cusub oo uu bixinayo tallo caafimaad oo khibrad leh oo isla markiiba ah kalkaaliye caafimaad, 24 saac maalintii, 7 maalmood toddobaadkii.

Ku wac 1300 60 60 24 kharashka taleefanka caadiga meel kasta oo aad Victoria ka joogto*.



NURSE-ON-CALL
1300 60 60 24

TALLADA CAAFIMAADKA DHAMMAN DADKA
VICTORIA EE AH 24 SAAC



NURSE-ON-CALL wuxuu ku siinayaa isticmaalka adeegyada turjubaanka dadka soo wacaya ee aan ku kalsooneyn Ingiriiskooda.

Isticmaalku waa helayaan dadka hadalka iyo maqalka wax ka qaba iyagoo la soo xirriiraya Adeega War gudbinta ee Qaranka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan NURSE-ON-CALL, gal www.health.vic.gov.au/nurseoncall

A Victorian
Government
initiative



Bilowga Dawlada Victoria
Waxaa ogolaaday by Peter Allen,
Department of Human Services
50 Lonsdale Street, Melbourne Victoria 3000

**Hadda qof kasta
oo Victorian ahi
wuxuu leeyahay
KALKAALIYAHA-
HEEGANKA-AH
1300 60 60 24**

Macluumaad caafimaad oo taleefanka
ah 24 saac maalintii



WAAN KULA JOOGNAA MARKAAD NOO BAAHAN TAHAY

NURSE-ON-CALL wuxuu islamarkiiba kula xirriirsiiyaa kalkaaliye diiwaangashan si uu kuu siiyo tallo caafimaad oo daryeel aqooned leh saacad kasta. Wixii gargaar degdeg ah waa inaad had iyo jeer wacdaa 000 laakiinse wakhtiyada kale NURSE-ON-CALL ayaa laga yaabaa inuu yahay doorashadaada ugu fiican ee tallo caafimaad ku siineysa. Tusaale, waxaad wici kartaa marka:

- Adiga ama qof aad daryeeshaa uu xannuunsanayo
- Markay tahay habeen badhkii oo aadan hubin inaad raadsato caawimaad caafimaad iyo in kale.
- Aad guriga ka maqan tahay amase aad aad uga fog tahay caawimaada caafimaad
- Oo aad dooneyso oo keliya tallo ama macluumaad ku saabsan adeegyada caafimaadka oo meeshaad joogto ku yaal.

Xor baad u tahay inaad wacdo NURSE-ON-CALL si aad ugala hadasho wixii arimo ah ee la xirriira caafimaadka. Si sahal ah u wac 1300 60 60 24 meel kasta oo Victoria ah, oo kugu kaceysa kharashka wicitaanka caadiga ah*.

MAXAA DHACAYA MARKAAN SOO WACDO TALLO CAAFIMAAD?

Tallaabada 1 – Kalkaaliye diiwaangashan ayaa ka jawaabi doona soo wicitaankaaga oo kaa qaadi doona faahfaahin aasaasi ah.

Tallaabada 2 – Ka dib kalkaaliyaha ayaa ku weydiin doona su'aalo xirriir ah oo ku saabsan astaamo ah iyo arimaha kale ee la xirriira caafimaadkaaga.

Tallaabada 3 – Wicitaanka ka dib kalkaaliyaha ayaa kugula talinaya siyaalaha aad u daryeelayso nafsadaada, kugula talinaya inaad u tagto dhakhtarka caadiga ah (GP) ama, haddii arintaadu ay khatar tahay, u wareejin doona taleefankaaga 000. ogow inaysan kalkaaliyayaashu bixin wiisatada astaamahaag oo dhan.

Kalkaaliyayaashu waxay isticmaalaan macluumaadka ugu danbeeyey ee caafimaad ee la helayo, si ay kuu siiyaan tallada ugu tayada sareysa ee ku saabsan arinta aad u soo wacday.

Xaqiiqdii, dhammaan macluumaadka ee aad bixiso wuxuu ahaanayaa mid qarsoon diiwaankuna si buuxda ayuu ammaan u yahay.

TALLO CAAFIMAAD, IYO DHEERAAD

NURSE-ON-CALL waxay sidoo kale ku siin karaan macluumaad kale oo la xirriira caafimaadka, sida faahfaahinta adeegyada caafimaad ee meeshaad joogto ama lambarada khadadka kale ee taleefanka wax ku caawiya.

NURSE-ON-CALL waxay siisaa dhammaan dadka Victoria hubaal ah ogaanshaha in tallada caafimaadka ee aqoonta lehi ay u jirto oo keliya wicitaan, wakhti kasta oo ka mid ah habeenka ama maalinta.

NURSE-ON-CALL 1300 60 60 24

*Wicitaanada taleefanka gacanta waxaa laga yaabaa in lagu dalaco lacag ka sareysa taleefanka caadiga ah.

Christine - Kalkaalisu diiwaangashan



WIXII GARGAAR DEGDEG AH AMA XAALADAHA NAF KA DHAWRKA AH, WAA INAAD HAD IYO JEER WACDAA 000